



**Foomka Su'aalaha Qoraalka ah ee Qofka Taageerada ama Taageerada Qoyska Loo Qoondeeyay iyo Baaritaanka Soo Booqdaha kaasi oo loogu tala galay sii wadidda Xarumaha Daryeelka (Designated Family/Support Person and Visitor Screening Questionnaire for Continuing Care facilities)**

Buuxi foomka su'aalaha qoraalka ah ee hoose si aad gacan uga geysato sidii loo go'aamin lahaa inaad u qalanto iyo in kale booqasho inta uu socdo safmarka COVID-19 si loo bixiyo bii badbaado leh oo loogu talagalay shaqaalaha, dhaqaatiirta, tabaruceyaasha, qandaraasleyaasha, bukaannada iyo qoysaska.

Ka Madaxa Caafimadka ee Ugu Sarreeya ahaan [Amarka 29-2020](#) iyo Siyaasadda AHS ee Soo Booqdaha, Qof Loo Qoondeeyay Taageero/Taageero Qoys iyo Soo Booqdeyaasha waa inay buuxiyaan hubin ku saabsan heerkulka jirka iyo foomka su'aalaha qoraalka ah kahor intii aysan soo galin guriga lagu xannaaneeyo dadka waayeelka ah, xarun muddo dheer dad lagu xannaaneeyo, xarun loo qoondeeyay in dad la taageero ay ku noolaadaan ama mid dadka kunool in la kala fogeeyo si aysan cudur isku qaadsiiin loogu tala galay.

Dhammaan soo booqdeyaasha waa in:

- Goobta laga filayo inay yimaadaan ayadoo loo sii diyaarinaayo booqashooyin ay kula kulmayaan maareeyaha xarunta.
- Ay saxiixaan buugga diiwaanka markii ay soo galayaan iyo markii ay baxayaan. Ay qoraan waqtiga imaanshaha iyo waqtiga bixiyaanka (haddii ay soo galayaan dhismaha).
- Ay buuxiyaan shardiga nadaafadda gacmaha (ay dhaqaan ilaa 30 ilbiriqsi iyo/ama ay isticmaalaan gacma nadiifiye dareere ah) ayna xirtaan maaskaro goobta laga siinayo.
- Ay joogaan meesha booqashada ee loo qoondeeyay (qolka qofka meesha daggan, meel la wadaago ama meel bannaanka ah). Inay kala fogaadaan iyaga iyo soo booqdeyaasha kale iyo dadka meesha daggan.

Haddii qofi uga jawaabo **HAA** wax ka mid ah su'aalaha, waa **inaan loo** ogolaan inuu meesha soo galo.

Ishakhsiyaadka qaba **qandho, qufac, neefta oo dhib ku ah, sanko oo diif ka dareerayo , ama dhuun xanuun** , waxaa laga doonayaa inay dadka kale gooni isaga soocaan 10 maalmood sida uu qabo [CMOH Amarka 05-2020](#) inuu helo jawaabta baaritaanka COVID-19 oo inuusan qabin muujinaysa maahee uuna dareemayo inuu soo roonaaday. Isticmaal [Aaladda Qiimeynta Internetka ee AHS](#) si loo go'aamiyo bal in lagu talinaayo baaritaan iyo in kale; xog ku saabsan sharuudaha gooni u soocidda waxaa laga heli karaa [halkaan](#).

Foomka su'aalaha qoraalka ah waxaa uu un la xiriiira **calaamadaha cusub** ama **kasii daraya** ee la xiriira xasaasiyadaha, xaaladaha halista ah ee raagay iyo kuwa horay usii jiray. Dadka qaba calaamadahaas la xiriira xaalado horay usii jiray waxay wali soo booqan karaan.

**BAARITAANKA – SI LOO GO"AAMIYO BAL IN QOF LOO QOONDEEYAY TAAGEERO/AMA TAAGEERO  
QOYS UU MAANTA SOO GALI KARO IYO IN KALE <sup>1</sup>  
(SCREENING – TO DETERMINE IF DESIGNATED FAMILY/SUPPORT PERSON AND VISITOR MAY ENTER TODAY<sup>1</sup>)**

1.	Miyaad qabtaa wax <b>cusub oo bilow ah (ama kasii daraya)</b> oo ah astaamaha soo socda: <b>qandho, qufac, neefta oo gaaban/ama dhib kugu ah, sanko oo diif uu ka dareero, dhuun xanuun</b> , qarqaryo, wax liqidda oo kugu adag, sanko oo ku xirma, xanuun aad ka dareento oogada/tacaabo, lalabbo/matag/shuban, hamuunta oo u lunta si aan la sharrixi karin, dareenka wax urinta ama kan dhadhanka oo luma, murqo/kala goysyo xanuun, madax xanuun, iyo/ama indho xanuun (oo si guud loogu yaqaan indho binki ah)?	HAA	MAYA
2.	Miyaad u safartay meel ka baxsan Canada 14kii maalmood ee lasoo dhaafay?	HAA	MAYA
3.	Miyaad la kulantay oo aad ugu dhawaatay qof la xaqiijiyay inuu qabo COVID-19 14kii maalmood ee lasoo dhaafay? <i>Aad ugu dhawaan waxaa lagu qeexay kulan fool-ka-fool ah oo la isu jirsado 2 mitir wax ka yar. Shaqaale caafimaad oo jooga goobta shaqada oo xiran qalabka badbaadada shakhsiga ee lagu taliyay looma tixgalinaayo inuu yahay qof aad loogu dhawaaday oo aan loo baahnayn in loo dhawaado.</i>	HAA	MAYA
4.	Miyaad aad ugu dhawaatay qof qaba wax kamid ah halna ha ahaatee <b>astaamaha 5ta ah ee ugu horreeya</b> ee ku jira liiskaan: <b>qandho, qufac, neefsashada oo dhib ah , sanko oo diif ka dareerayo</b> ama <b>dhuun xanuun</b> OO aad ugu dhawaaday qof la xaqiijiyay inuu qabo COVID-19 14kii maalmood ee lasoo dhaafay?	HAA	MAYA
<p>Qiimeyn ma ku samaysay halista aad ugu jirto adiga shakhsi ahaan baylah u noqosho aan la ogeyn oo ku salaysan hawlihii labadii asbuuc ee lasoo dhaafay (hooseysa, dhexdhexaad, sarreysa)? Qiimeyn ku samee halistaada ka shakhsi ahaan aad ugu jirto baylah u noqosho aan la ogeyn oo ku salaysan hawshaadii labadii asbuuc ee lasoo dhaafay <i>(tixraac foomka Hubinta ee Halista Baylah u Noqosho aan la Ogeyn-21704)</i></p>			
<p>Xaqiiji inaad fahamto Habdhaqannada Booqashada ee Badbaadada leh iyo siyaasadaha goobta ee la xiriira <i>(tixraac <a href="#">CMOH Amarka 29-2020 Lifaqa A</a>)</i></p>			

<sup>1</sup> Hawlwadeennada **loogama baahna** inay xareeyaan dukumiintiyada baaritaanka COVID-19 ee la buuxiyay ee dadka soo galaya. Hawlwadeennada **waxaa looga baahan yahay** inay qoraan magaca oo kaydiyaan magaca, xogta qofka lagala xiriirayo iyo taariikhda/waqtiga uu soo galay/ama baxayo ugu yaraan 4 asbuuc laakiin waxaan ka badnayn 8 asbuuc.

Magaca oo la daabacay: \_\_\_\_\_ Saxiixa: \_\_\_\_\_ Taariikh: \_\_\_\_\_